

WAA MAXAY PARENT LINE? (WHAT IS PARENT LINE?)

Parent Line waa adeeg kula-talin taleefan ah, macluumaad ah iyo meel-u-dirid ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelaayaasha carruurta da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 18 sano, kuwaas oo ku nool New South Wales.

Waalidiinta iyo daryeelaayaasha meel kasta oo ay ka joogaan dowlad-goboleedka waxay ka wici karaan Parent Line lambarka lacag la'aanta ah ee 1300 1300 52.

Waxaa nala ka heli karaa 24ka saac maalin kasta oo ay ku jiraan fasax-weynaha dadweynaha.

Dhammaan wicitaannada waxaa ka jawaabi doona kooxdayada sida sare loo tababaray, ah la-taliyeyaal xirfadeed mushaari ah. La-taliyeyaasheenu waxay ka kala yimaadeen asallo kala duwan oo ay ka mid yihiin shaqada bulshada, cilmi-nafsiga iyo daryeelka bulshada waxay leeyihiin sanooyin badan oo khibarad ah ee caawinta qoysaska ay hayaan dhibaatooyinka ballaaran.

Dhammaan wicitaannada la wacp Parent Line waa kuwo qarsoodi ah.

Adeegayaga waxaa heli kara dhammaan daryeelaayaasha, qoysaska, iyo xirfad-yaqaannada ayadoon loo eegayn asalka dhaqankooda. Waxaan badanaa la shaqaynaa hooyooyinka, aabayaasha, awooweyaasha iyo ayeeyoyaasha, adeerka hooyada qaba, saaxiibada, qaraabada, daryeelaayaasha iyo shaqaalaha goobta.

Hadda waxaa noo shaqeeya la-taliyeyaalka Maandariinka, Kaantaniiska, Fiyatnamiiska iyo Isbaanishka.

MAXAY WAALIDIINTA IYO DARYEELEYAASHU U WACAAN PARENT LINE? (WHAT DO PARENTS AND CARERS CALL PARENT LINE ABOUT?)

Waalidiinta iyo daryeelaayaashu waxay wici karaan Parent Line si ay uga wada-hadlaan arimaha waalidnimada. Mararka qaarkood waxay wacaan si ay macluumaad uga helaan arimaha guud ama wax ku saabsan adeegyada degaanka.

Waxaan ka caawin karnaa waalidiinta arimaha waalidnimada oo ballaaran oo la xiriira dhaqanka carruurta, baahiyaha koritaanka iyo caadifadaha inta lagu jiro dhammaan marxaladaha carruurnimada iyo qaangaarnimada.

Maxay yihiin waxyaalaha Aysan qaban Parent Line? (What Does Parent Line NOT do?)

La-taliyeyaasha jooga Parent Line aqoon uma leh inay bixiyaan talooyinka sharciyeed iyo caafimaad.

Haddii aad ka walwalsan tahay caafimaadka ilmahaaga, fadlan la xiriir dhaqtarkaaga degaanka, Khadka Health Direct Information Line oo ah 1800 022 222, isbitaalka degaankaaga ama waxaad taleefan u dirtaa Lambarka Degdegga ah 000.

Waxaan kaloo haynaa xiriiro caawimaad kale oo websitekan ku qoran.

SIDEE NALoola SOO XIRIIRI KARAA? (HOW TO CONTACT US?)

Waxaad wici kartaa 1300 1300 52 – 24ka saac maalintii, toddobaadkiiba. Waxaad email u diri karta info@parentline.org.au wixii su'aalo guud ah oo la xiriira Parent Line iyo Waalidnimada. Waxay qaadan kartaa 2-4 maalmood si aad u hesho jawaab-celin email ah.

Ka eeg website-keena ah www.parentline.org.au